

Ku:- Gudoomiyaha Golaha Shacabka

Muqdisho

28/01/2015

28/1/15

Ujeedo:- Mooshin Sixitaan Hindisa Sharciyeedka Hantidhawrka Guud ee Qaranka

Guddoomiye,


Anagoo ah xildhibaanada hoos ku saxeexan waxaan codsanaynaa in sixitaan lagu sameeyo qodobada hoos ku qoran. Sababta aan u dalbanayano sixitaanka waxay tahay

1. Ilaalinta madaxbanaanida Xafiiska Hantidhawraha Guud ,
2. khaladaad ku jira xaga luqada oo cadeyn u baahan ,
3. Qodobo dastuuri ah oo macnahooda waxaan ahayn laga dhigay,
4. Qodobka 67 farqadiisa 7aad ee Xeer hoosaadka oo tilmaamaya shaqada Gudigga Maaliyadda oo la baalmarey.

Guddoomiye

Waxaan hoos kuugu soo taxnay qodobada aan rabno in laga doodo oo la saxo inta aan cod la galin Hindise Sharciyeedka lagu cadeeyo - Dawladda Fadaraalka ama Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Fadaraalka.

1. Hindisa Sharciyeedkan Hantidhawrka Guud ee Qaranka waa in loogu yeeraa magaca ah **"Hindisa Sharciyeedka Hantidhawraha Guud ee Dawlada Fadaraalka"**
2. **Qodobka 8aad** – waa in laga saaraa farqadiisa **2 iyo 3**. Guddiga maaliyaddu waxuu leeyahay kor jeegteyn kaliya sidaa darteed shaqadiisa ma aha in uu hantidhawre miisaaniyadiisa talo ku yeesho ama baaro. Xafiisyadda madax banana iyo Guddiyadda madax banana midna talo ama faragalin toos ah Guddiga Maaliyaddu kuma laha sidaa darteed Xafiiska Hantidhawraha Guud kuma yeelan karo sida u qabo **Xeer Hoosaadka Golaha qodobkiisa 67 farqadiisa 7aad**. Waa in loo daayaa sidii u qornaa Hindise Sharciyeedka asalka ah ee loo soo gudbiyey Golaha.
3. **Qodobka 24aad** waa in laga saaraa gabi ahaanba **Xarafka F iyo G** sababtoo ah looma baahna oo waa khalad. **Sidoo kale farqadda kale ee gadaal looga darey ee A iyo B** ee cuskanaysa qodobka Dastuuriga ah ee 69 farqadiisa **2aad xarafka C** – waa baal marsanyahay macnaha qodobka isla markaana waxaa Xafiiska Hantidhawrka laga dhigey Xafiis siyaasadeed sida **R/Wasaaraha**. Ma jirto Xafiis madax Banaan ama Guddi



Madax Banaan oo sidaa loola dhaqmo marka qodobku waxaanu tilmaamey ayaa loo adeesaday. Waa in loo daayaa sida u qornaa Hindise Sharciyeedka asalka ah ee loo soo gudbiyey Golaha.

4. Qodobka 30aad Waa in loo daayaa sida u qornaa Hindise Sharciyeedka asalka ah ee loo soo gudbiyey Golaha oo sheegaya in loo gudbiyo Wasiirka Maaliyadda hadii masuulka ama Wasiirka ay khuseyso saddex bilood ku sixi waaya khaladka Hantidhawrku tilmaamay. Guddiga Maaliyaddu shaqo iyo faragalintoona kuma laha.
5. Qodobka 31aad ee lagu daray waa in gabi ahaanba la tiira madaama aanay Guddiga Maaliyaddu Shaqo ku Lahayn. Tiira
6. Qodobka 33aad farqadiisa 1aad, waa in laga saara qaybta danbe ee tilmaamaysa in Hantidhawaraha Guud ee Federaalku uu baari karo Dawladaha Xubinta ka ah Dawlada Fadaraalka , Maamul Goboleedyadda iyo Dawladaha Hoose. Waa in loo badalaa mashaariicda ama meel aha kale ee Xukuumadda Fadaraalku maalgalisey kaliya.

Magacda Xildhibaanadda soo jeediyey Mooshinkan

1. XIL. Mahamed Ahmed Kulan David
2. XIL. MOHAMMED ABDI YUSUF Musa
3. XIL. Abu Bakr Noor Mohamed Abu
4. XIL. Faarax Cawel Shah
5. XIL. Maryam Mahamed Isag Musa
6. XIL. Saqo Adan Mahamed Musa
7. ~~XIL. Saqo Adan Mahamed~~ ~~Musa~~
8. XIL. Adan Saadeq Mohamed Hussein
9. XIL. Abdulkadir Adan Noor Tahil
10. XIL. Tahil Abdi Mohamed Tahil
11. XIL. YUSUF DIRIR ABDI Seboise
12. XIL. Yusuf M. Ali Yusuf
- 13.
- 14.
- 15.